MIDNIMADA MUSLIMIINTA & JABKA YUHUUDA

MIDNIMADA MUSLIMIINTA &JABKA YUHUUDA

SH. AL-IMAAM
RABIIC BINU HAADI AL-MADKHALI

TURJUMIDDII:
CABDIRISAAQ –ABU CUBEYDA

WEGEN
DHAQAN IYO DHIGAAL

©CABDIRISAAQ-ABU CUBEYDA

NASHQADEYNTA, QAABEYNTA JALDIGA IYOQURAARIDDA BUUGGA:

CABDIRISAAQ-ABU CUBEYDA

TIFATIRKA:

MUUSE M. CUSMAAN

@WEGEN
+252 63 7840707
wegen0425@gmail.com
https://t.me/Wegen_4


بسم الله الرحمن الرحيم

Ereyga afnaqaha (tarjumaaga)

Akhristaha iyo buug yarahan gacantiisa ku jira inta aanan isaga dhex-bixin waxa aan lagamammaarmaan u arkay iyo xil i saaran in aan wax ka idhaahdo mawduuca uu buug-yarahani daaran yahay iyo Caalimka qoreyba.

Aan ugu horeysiiyo mawduuca buuggan: waa buug-yare muc iyo miid ballaadhan leh kaas oo ka hadlaaya baahiyaadka ay umaddeenu la nooshahay, isagoo raacinaya xalka iyo asbaabtii lagaga gudbi lahaa. Buuggan waxa uu ka kooban yahay afar farriimood\dhambaal-Fariinta ugu horaysa waxa ay ku socotaa akhristow duulka xun ee Yuhuuda iyada oo isugu jirta digniino iyo kibir jabin. Fariinta labaad waxa ay ku socotaa muslimiinta guud ahaan iyadoo isugu jirta wax-sheeg, waanno, digniin iyo sidoo kale bushaarayn. Farriinta saddexaad waxa ay ku socotaa madaxda musliinta u talisa. Farriinta afaraad ee ugu danbaysa waxa ay ku socotaa shacabka reer Falastiin oo waa fariin wax sheeg iyo waano lagu bilay oo muc iyo miisaan weyn leh. Ugu danbeyntii, sheekhu waxa uu ku soo gunaanadayaa sida caadada u ah duco murti badan wuxuuna u sardi (tixi) doonaa farriimahan, muuqaal si toos ah ugu sawirmaaya dareenka, raad aan ba'ayna kaga tegaaya duunka dhegeystaha.

Caalimka buuggan qoray waa Caalim ka mid ah culimmada Islaamka ee hada nool waana kuwa ugu da'da weyn oo boqolkii ayuu afka la sii galayaa. Waa aqoon dhaadhi dhadhan leh. waa sheekh wax sheegiisu duug reeb yahay. Waa sheekh naqdin tiisu tahay mid hanqadho jebin ah taas oo dib u baraarujisa qofka uu naqdinaayo kana duulisa leexsanaanta iyo gacan bidixeenta diinta. Sheekh Rabiic al-Madkhali waa sheekh farriimihiisa iyo naqdintiisu ay yihiin kuwo guullaamo dhanbalo kulul oo cid weliba gar waaqsanayso in uu godladey garaad waayo-arag ah oo ay aqoon gaamurteyna hagayso. Waa adoon qeyb muddakarnimo ah kaga jira difaaca diinta qub ama tufna ku leh naqdinta kuwa baal maray tubta toosan isagoo naqdintiisu tahay mid lagu milgeeyay kitaabka Alle iyo sunnada Rasuulkiisa suubanaa SCW. Waa sheekh aan ku hadlin af xisbi mid diineed iyo mid kale toona. Mana laha sal-fudeyd iyo laab-la-kac oo aan u hadlin waxna uga qorin si caadifadeesan. Si gabasho leh waxaan u odhan karaa in uu buuxiyey dadabta af miishaarnimadii ka bannaanaatay docdii Sheekh Islaam ibnu Taymiya ilaa haddana aan la heyn amminkan cid soo deyrtay ama u soo mudha oo jagadaas buuxisa oo aan aheyn Sh. Rabiic al-madkhali.

FARRIIN KU:

UMADDA DULLIGA

Ku socota Umadda dulliga iyo cadhada kuwaas oo Alle ka yidhi:

فَبَآءُو بِغَضَبٍ عَلَىٰ غَضَبٍۚ وَلِلۡكَٰفِرِينَ عَذَابٞ مُّهِينٞ ٩٠

سورة البقرة

(waxa ay la noqdeen cadho loo geeyay cadho oo gaaladu waxa ay leeyihiin cadaab dufeysa).

Ku socota Ummadda hadhiinyoda[1] ah, sadhoda[2] ah, hungoda[3] ah. Kuwaas oo uu Alle ku saliday faqrinnimo iyo baahi aan dhammaan (xaga nafta) taas oo abaalmarin looga dhigay gaalnimada ay la yimaaddeen iyo Nebiyada ay laayeen.

ضُرِبَتۡ عَلَيۡهِمُ ٱلذِّلَّةُ أَيۡنَ مَا ثُقِفُوٓاْ إِلَّا بِحَبۡلٖ مِّنَ ٱللَّهِ وَحَبۡلٖ مِّنَ ٱلنَّاسِ وَبَآءُو بِغَضَبٖ مِّنَ ٱللَّهِ وَضُرِبَتۡ عَلَيۡهِمُ ٱلۡمَسۡكَنَةُۚ ذَٰلِكَ بِأَنَّهُمۡ كَانُواْ يَكۡفُرُونَ بِـَٔايَٰتِ ٱللَّهِ وَيَقۡتُلُونَ ٱلۡأَنۢبِيَآءَ بِغَيۡرِ حَقّٖۚ ذَٰلِكَ بِمَا عَصَواْ وَّكَانُواْ يَعۡتَدُونَ ١١٢

سورة آل عمران

(Waxaa la saaray duli meelkastoo ay joogaanba, waxaan aheyn markii ay ku hoos jireen xadhiga (axdi/magan) xag Alle iyo xadhig (axdi/magan) xagga dadka ah; waxay la noqdeen cadhada Allaah, oo waxaa la saaray korkooda darxumo. Taasi waxaa ugu wacan in ay ku gaaloobaan Aayadaha Allaah oo ku dilaan Nebiyada xaqdarro. Taas waxaa ugu wacan caasinimadooda iyo xadgudubkooda).

Tani waa in ka mid ah sifooyinkiina taas oo aad ku muteysateen (*ka gaaloobitaaanka Alle iyo dilka Nebiyada*) dullinimo, taag-darro, baahi iyo cadho Alle.

Ma-na-lihidin sooyaal ku dhisan iimaan. Sidoo kale idiinma sugnaan ragganimo iyo geesinnimo. Weligiinba waxa aad ka dagaalami doontaan gidaaro dabaddood. Dhexdiidana-

[1] Handhiiyo: La liiday (Afnaqaha)
[2] Sadho: Wasakhda; nuqsaantana wey noqotaa. (Afnaqaha)
[3] Hungo: Madhan. (Afnaqaha)

waad isku darran tihiin.Tilmaamihiina xummina, wey baddan yihiina waxaana ka mid ah: isdaba marinta, sirriq[4] dhiga, saacufnimada[5], dagaal kicinta, abuuritaanka iyo humhumanshada[6] fitnooyinka, hurinta dagaallada iyo sidoo kale in aad la-orodaan dhulka, dhibaato.

Kol kasta oo aad dagaal kicisaanna, Alle ayaa damiya. Taariikh-diiduna, waa mid madow. Umad kastana, agtooda (maqaamka aad ku leedihiin), saayo[7], ayaad ka tihiin.

Duulkan, waxaan leeyahay Muslin welbana odhanayaa: ha kibrina, ha is laalacina[8], hana ku dagmina guusha hungada ah ee aad gaadheen. Alle baan ku dhaartee, kamaydaaan badin ciidankii Nebi Muxammed CSW , oo kamaydaan badin caqiidadii Nebi Muxammed CSW, (Caqiidada Tawxiidka), kamaydaan badin hogaamiyayaal[9] ay hogoominayeen: Khaalid Binu Waliid, Abu Cubeyda Binu Jaraax, Sacad Binu Abi Waqaas, Camar Binu Caas, Nucmaan Binu Muqrin (RCM) kuwaas oo ku soo barbaaray, caqiidadii Nebi Muxammed iyo manhajkiisii qummanaa, taas ayey iyaguna ciidankooda ku hinjinyeen[10], hirrigna[11] ka dhawreen, kuna hogaamiyeen si ay u sarayso kelmada Ilaahay. Foolkooda, mey soo istaagin kuwa idinka awood iyo wax baabi'in badan (oo la mey dagaalamin) kuwaas oo ahaa, ciidamaddii iyo Jabbaabiradii *Kisra* iyo *Qeysar* oo kama aanay badin (ciidamadii *Kisra* iyo *Qeysar*) koox uu xaalkoodu sidaa yahay, caqiidaddooduna muuqato, manhajkooduna cad-yahay oo aanu higaaganeyn[12], ujeedadoodu ay tahay in ay kelmada Alle kor ahaato. Kolkaa, waxa aad ka badiseen (yuhuudeey) duul hadhaa ah.

۞فَخَلَفَ مِنۢ بَعۡدِهِمۡ خَلۡفٌ أَضَاعُواْ ٱلصَّلَوٰةَ وَٱتَّبَعُواْ ٱلشَّهَوَٰتِۖ فَسَوۡفَ يَلۡقَوۡنَ غَيًّا ﴿٥٩﴾

سورة مريم

Waxaase ka gadaal maray hadhaa dayacay salaadda oo raacay hawooyin-kooda; waxayna la kulmi doonaan hoog.

Waxa aad ka badiseen duul aan badankoodu aamin-saneyn Caqiidadii Nebi Muxammed SCW iyo asxaabtiisii, kuwaas oo aan raacin hilinkii Nebi Muxammed SCW iyo

---

[4] Siriq: Dabin. (Afnaqaha)
[5] Saacuf: Ur-ta-. (Afnaqaha)
[6] Humhuman: isku diyaarin. Feydasho: yacnii heerka uu ka joogo jaceylka ay u qabaan fitnooyinka (Afnaqaha)
[7] Saayo: daayeerka dheddig. (Afnaqaha)
[8] Laalacin\ is laalacin: meel sare is-sasaaris. Is weyneen.. (Afnaqaha)
[9] Hugmo: Dabaylo soo guuxaya. (Afnaqaha)
[10] Hinjin: Kor u qaadis. (Afnaqaha)
[11] Hirrig: Meel qodax leh (Afnaqaha)
[12] Higaagan: daboolan; aanu dabool-leyn (Afnaqaha)

Ciidankiisii, oo aan u dagaallamin ujeedaddii ay u dagaalamayeen Nebi Muxammed iyo Asxaabtiisu.

Hebebeda-yaal[13] ayaa aad ka badiseen, dawladiinuna waxa ay u istaagtay fashilkooda iyo qummanaan la'aantooda. Taas ayaa idinkuna dhulka ugu sarayseen.

وَقَضَيۡنَآ إِلَىٰ بَنِيٓ إِسۡرَٰٓءِيلَ فِي ٱلۡكِتَٰبِ لَتُفۡسِدُنَّ فِي ٱلۡأَرۡضِ مَرَّتَيۡنِ وَلَتَعۡلُنَّ عُلُوّٗا كَبِيرٗا ۝٤ فَإِذَا جَآءَ وَعۡدُ أُولَىٰهُمَا بَعَثۡنَا عَلَيۡكُمۡ عِبَادٗا لَّنَآ أُوْلِي بَأۡسٖ شَدِيدٖ فَجَاسُواْ خِلَٰلَ ٱلدِّيَارِۚ وَكَانَ وَعۡدٗا مَّفۡعُولٗا ۝٥ ثُمَّ رَدَدۡنَا لَكُمُ ٱلۡكَرَّةَ عَلَيۡهِمۡ وَأَمۡدَدۡنَٰكُم بِأَمۡوَٰلٖ وَبَنِينَ وَجَعَلۡنَٰكُمۡ أَكۡثَرَ نَفِيرًا ۝٦ إِنۡ أَحۡسَنتُمۡ أَحۡسَنتُمۡ لِأَنفُسِكُمۡۖ وَإِنۡ أَسَأۡتُمۡ فَلَهَاۚ فَإِذَا جَآءَ وَعۡدُ ٱلۡأٓخِرَةِ لِيَسُٓـُٔواْ وُجُوهَكُمۡ وَلِيَدۡخُلُواْ ٱلۡمَسۡجِدَ كَمَا دَخَلُوهُ أَوَّلَ مَرَّةٖ وَلِيُتَبِّرُواْ مَا عَلَوۡاْ تَتۡبِيرًا ۝٧

سورة الإسراء

(4). Oo waxaan ugu qorney Ilmihii Israa'iil Kitaabka: Waxaad hubaashii fasaadiin doontaan dhulka labo jeer oo ku sarreyn doontaan sarreyn weyn .

(5). Markii uu yimaaddo yabooha tan horre, waxaan idinku soo diri doonnaa addoomo aan leenahay oo dagaal darran leh. Markaas, bey xuli doonaan oo idinku soo geli doonnaan guriyihiina dhexdooda. Waana yabooh (ballan) la falayo.

(6). Misna Waxaan markale idiin soo celinnay guusha oo Waxaan idinku xoojinay maal iyo caruur badan oo idinka yeelnay kuwa tirro badan(toobad keenkiinna darteed iyo axsaan falkiinna iyo u khuduuciinna Allah).

(7). Haddii aad samo fashaan, waxa aad u sama faleysaan uun waa naftiinna, oo haddii aad xumaan fashaan (waxay uun ka go'an tahay) naftiina. Markii uu yimaado yabooha dambe (aad ku fasaadineysaan arlada), (Waxaan ka yeeli doonnaa cadowyadiinna mar kale) inay xumeeyaan wajiyadiinna iyo in ay galaan masjidka (Qudus) siddii ay u galeenba awal horre iyo in ay baabi'iyaan wax kasta oo ay gaadhaan gacmahoodu baaba' muuqda.

Waa taa sooyaalkiinii , sidaas oo kale ayaa Alle idinkula macaamilayaa.

وَإِنۡ عُدتُّمۡ عُدۡنَاۚ وَجَعَلۡنَا جَهَنَّمَ لِلۡكَٰفِرِينَ حَصِيرًا ۝٨

سورة الإسراء

[13] Hebebed: Nacas. (Afnaqaha)

Haddiise aad u noqotaan (fasaadinta arlada), waxaan u noqon doonnaa (ciqaabtayaddii, weyna fasahaadiyeen mar kale arlada, markaas buu Allaah ku saliday Rasuulkiisii Muxammed iyo asxaabtiisii). Waxaana uga yeelney Naarta gaalada gogol

Waa idinkaa soo rogaaal celiyey, waannu idiin soo rogaal celin donnaa, qabtinka Alle ee darran. Wuxuuna ku soo rogaal celin doonnaa ciidamada Nebi Muxammed ee maaha dhalihiina iyo dhalaha reer galbeedka.

Ha dagmina oo ha is macaashina, Alle baan ku dhaartee, kama aydaan guuleesan Islaamka saxda ah oo kama aydaan gacan sarreen Himirkii[14] Nebi Muxammed SCW, Faaruuq-(Cumar RC), Khaalid RC iyo hoodaar-raddii[15] mullaaxda[16] lahaa.

FARRIIN KU:

MUSLIMIINTA GUUD AHAAN

Muslimiinta guud ahaan mijo iyo madax , kooxo iyo qolooyin, culimo iyo aqoon yahanno— xilimaad ku sugnaaneysaan, noloshan dullinimada ah? Ilaa goorma ayaa aad ku noolaaneysaan hungadan? Ilaa goorma? ilaa goorma? ilaa goorma? Mayee waxgarad-kiinii!? Mayee culimaddiinii !? Mayee aqoon yahankiinii? Mayee abaanduuliyaashiinii?

Waxaad aas-saasteen kumanaan iskuulo iyo jaamacado ah— mayee midhahoodii? Alle baan ku dhaartee, haddii boqolkiiba toban ka mid ah jaamacaadka iyo iskuulladu ay dabaqi la haayen, hinjin[17] la haayeen, kuna hannayn[18] la haayeen manhajkii Nebiga CSW— caqiido ahaan , akhlaaq ahaan iyo dhaqan gelin fogba, duniduba wey ifilaheyd; tawxiidka iyo iimanka lagu dhigayo darteed. Waaney gabbaabsi la heyd mugdiyada jahliga, shirkigu iyo bidcooyinku. Cadowgiinnana la idin kuma salideen.

Miyaaney idiin taabaneyn waaqican qadhaadh in aad guruxa[19] ku celisaan- manaahijta-iskuulladiina, jaaamacaadkiina iyo hab tarbiyaytiina. Iminka ayaa ay tahay in si qoto dheeer loo fikiro si loo beddelo arrimahan is huwan iyo in la dhismeeyo manaahij ku dhisan Islaamka saxda ah taas oo ku tiirsan Kitaabka Alle iyo Sunnada Rasuulkiisa SCW iyo-

---

[14] Himir: Midho. (yacnii Saxaabadu RCM, waxay ka dhignaayeen geed hareeri ah oo uu Nebigu SCW, beeray). (Afnaqaha)
[15] Hoodaar: Habeendhalad; Dheeraad qof lagu ladhay, oo hibo gaara ah la siiyay, (Afnaqaha)
[16] Mullaax: Dunbuu leeyahay. (Afnaqaha)
[17] Hinjin: Kor u qaadis. (Afnaqaha)
[18] Hannayn: Bixin. (Afnaqaha)
[19] Gurux: Isha. (Afnaqaha)

hilinka[20] kuwii wanaagsanaa. Allaan ku dhaartee, umaddani ku haggaagi meyso, mooyaane waxay ku haggaageen kuwii hore.

Beddela Manaahijtan hadoofka[21] ah oo badanaa waxba soo saareyn—mooyaane, hadwadaan[22] hunguufti[23] ah. Tiir iyo gaashaan uga dhiga (manaahijtiina) manhajkii Rabbaaniga ahaa; Maxaa yeelay isaga uun ayey ku jirtaa badhaadhaha aduun iyo aakhiro waa haddii aad la dooneysaan la fihiina iyo umaddiina guul, badhaadhe iyo gacan sarayn aad ka saraynaysaan cadowgiina— kaas oo uu ugu horeeyo kuwa Alle dulli iyo habaas ku saliday (oo yuhuud ah).

FARRIIN KU:

MADAXDA MUSLIMIINTA GAAR-AHAAN

Waxaa korkiina saaran mas'uuliyad aad iyo aad u weyn; waxa ugu horaysa: in aad weelaysaan Kitaabka Alle iyo Sunnada Nebiga CSW iyo sooyaaalkii khulafadii hanuunsanayd, idinka oo ku hooshaaraya [24] caqiidooyinkiina, cibaadaadkiina, siyaasadiina iyo in aad ku barbaarisaan kuwa mas'uuliyaddu idinka saran tahay (Shacabka). Waxa kale ee idinku waajib ah [haddii aad rabtaan badhaadhe,] in aydin la haanyoon,[25] qawaaniinta reer Galbeedka ee guran[26]. Siyaasada umaddiina iyo baahiyaadkeeda adduunyo iyo aakhiro-ba in aad hasari[27] uga dhigtaan, haskana[28] ka tuntaan, Kitaabka Alle iyo Sunada Rasuulkiisii CSW iyo tubtii khulafadii hanuunsaneyd; maxaa yeelay waxaad tihiin adoomo Alle, dhulkiisana waad ku nooshihiin, risqigiisana waa cuneysaan oo waad cabeysaan, oo waad xidhaneysaan. Markaa, saw xaq idinkuma laha in aad caabudaan, u-

[20] Hilin: Waddo. (Afnaqaha)
[21] Hadoof: Wax madhan. (Afnaqaha)
[22] Hadwadaan: Lunsan. (Afnaqaha)
[23] Hunguufti: Faaruq ah. (Afnaqaha)
[24] Hooshaar: Xarageeyay (lagu bilay). (Afnaqaha)
[25] Haanyoon: la ordin. (Afnaqaha)
[26] Guran: Buuxin, Dhiman. (Afnaqaha)
[27] Hasari: Go'. (Afnaqaha)
[28] Haska: Dhaska fuula shay aan bariyahaa la adeegsan. (Afnaqaha)

mahadnaqdaan, u hogaansataan—qaanuun kiisana dhaqan galisaan, shacabkiina ku haloosi-saan[29] *dadkuna waxa ay heystaan diinta madaxdoodda.*

Waxaa kale ee idinku waajib ah, in aad sameysaan oo aad dhistaan, dhidibadana u taagtaan oo ababisaan ciidamo Islaami ah oo ku abbaban Kitaabka Alle iyo Sunadiisa. Waxaa kale oo lagama-maarmaan ah, in aad ku tarbiyadeysaan Caqiidadii iyo tubtii Nebi Muxammed, Faaruuq, Khaaalid, iyo in aadu ku hilin-saan, ujeedadooyinkii iyo yoollalkii uu Alle u jeexay Muxammed iyo Asxaabtiisii; si ay u noqdaan ciidamada Alle ee xaqa ah. Kolkaa, cidba idinkama gacan sarayseen.

وَإِنَّ جُندَنَا لَهُمُ ٱلْغَٰلِبُونَ ﴿١٧٣﴾

سورة الصّافّات

Iyo in ciidmadayadu ay iyaga yihiin kuwa adkaan dona.

Yoollal aan aheny mid aduun , sumado oolaysan,[30] wadaniyeysan, deegaameysan iyo mid intaaba ka daran.

Shacabkiina, waxaa ku filan waxa uu Alle u soo dajiyey, haddii ay ka tagaanna handoodsi[31] baa ku dhacaya taas oo keenaysa in idiin hooseestaan umadaha kuwa ugu xun, uguna kibirka badan. Allena, idinka qaadi maayo hogon-naantaa[32] iyo hoomaadkaa,[33] mooyaane in aad qabsataan Islaamka saxda ah, oo aad umaddiina iyo ciidamadiidana ku tarbiyadaysaan. Idinka oo taa ku la dhaya baabi'in iyo hooseyn aad hoosaysiinaysaan: sumadaha, afkaaraha iyo caqiidooyinka keenay umadda waaqican qadhaadh.

[29] Haloosi: Luuqeynta (yacnii ugu celcelisaan). (Afnaqaha)
[30] Oolo: Qolo. (Afnaqaha)
[31] Handoodsi: Hoos u foorarka. (Afnaqaha)
[32] Hogon: Hoos u jeedka (foorar). (Afnaqaha)
[33] Hoomaad: Daymoo. (Afnaqaha)

FARRIIN KU:

SHACABKA REER FALASTIIN GAAR-AHAAN

Ku socota shacabka reer falastiin gaar ahaan: waxaa ku waajiba shacabkan in ay ogaadaan, in Falastiin aan lagu furan islaamka guduhiisa gacan kale mooyaane gacantii Faaruuq RC iyo ciidamaddiisii. Kama aaney xoroobin (Falastiin) qudhunka yuhuuda, mooyaane islaamka xaqa ah—taas oo lagu furay gacantii Faaruuq RC.

In badan ayaa aan idiin difaacay\taliyey, mana garanayo shacab idinka sabir badan. Hayeeshee, in badan oo idinka mid ahi, ma laha caqiidaddii Faaruuq RC iyo Manhajkiisii toosnaa. Haddii se, jihaaadkiinu dhabo u ahaan lahaa Caqiidaddii iyo Manhajkii Faaruuq RC, dhibtiinu wey xalismi laheyd, guul iyo gacan sareena waad gaadhi la haydeen. Kolkaa, waxaa idinku waajib ah, in aad astaan iyo gabbaad uga dhigtaan caqiidadiina, manhajkiina iyo jihaadkiina Kitaabka Alle iyo sunnada Suubanaha SCW iyo in aad qabsataan dhammaantiin xadhiga Alle oo aydaan kala didin. U sameeya sida daddaal iyo ikhlaas: masaajidiina, madaaristiina, jaamacaadkiinana taas ku dabaala, kana run sheega intaas oo waad ka gaadhi doontaan guusha iyo libinta walaalaha daanyeerada iyo doofaarrada (yuhuuda).

Waxaa u sugnaandey, reer Shaam ee muslimiinta ah, ballanqaad dhab ah, taas oo uga timi mid runsheeg badan oo hoodaar ah—in laga guulay san doonno Yuhuud iyo Nasaarada. kuna dabaala daddaal wey idiin rumoobiye, haddii se sidaa aydaan samayn (daddaal la'aantaa) ma helaysaan dulli iyo quudhsi mooyaane.

Alle baan ku dhaartee, idiin aanfici meyso la hadaafeenta[34] Ameerica iyo Qaramada midoobay .

Gabagabadii, waxaan leeyahay: ku deg-dega asbaabta guusha ee dhabta ah. Tajaariib badanna wey idiin soo mareen oo gabno ah[35] waxna aydaan ka dheefin, hana noqoninna:

كـــالعيس فـــي البيـــداء يقتلهـــا الظمـــأ ❖ والمـــــاء فـــــوق ظهورهـــــا محمـــــولُ

[34] Hadaaf: Raacin. (Afnaqaha)

[35] Gabno: Hasha caana yaraysa. (Afnaqaha)

Waa siddii geela oo kale kaas oo meel lama daggaana ku sugan—geelaasoo uu dilayo oonku

biyihuna ay yihiin kuwo dhabaradooda dushooda lagu xanbaaray (ay saaran yihiin).

[**Murtiddu waxay tahay:** waa kuwo aan ka faa'iidaysaneyn waxay heystaan oo ay la mid-yihiin kuwo aan heysan oo reer Falastiin ama guud ahaan Muslimiintu, waa kuwo heysta jir[36] weyn oo aan hadeeyn[37] sidaa oo ay tahayna ka hareer mareen beddalkiisana ay ka dhigeen, qaanuun lagu hadoodiley[38] oo lagu shareeray gaalnimo aan sariig[39] la heyn *[ileen waa qaanuun gaalo e'*]

Ilaahayow umaddan waxaad ku xoojisaa arrin hanuun oo aad ku maamuusayso awliyadaada kuna duleenayso cadowyadaada. Allow saraysii kalmaddaada, xoojina diintaada , sharafna kuwa kuu hogaansamey. Waxaad tahay mid ducada maqla oo ajiiba e'.

[36] Jir: Roob weyn oo aan hore u qaadin. (Afnaqaha)

[37] Hadeeyn: Qarmin. (Afnaqaha)

[38] Hadoodiley: lagu qariyey, lagu shareerey. (Afnaqaha)

[39] Sariig: Xishood. (Afnaqaha)